

**INDEPENDENT LIVING SUPPORTS PILOT (BARNAAMIJKA TAAGEERISTA NOLOL  
MADAXBANAAN) (ILSP) CODSIGA  
(INDEPENDENT LIVING SUPPORTS PILOT (ILSP) APPLICATION)**

**Tilmaamaha Iyo Macluumaadka Muhiimka Ah**

Dhamaystirka iyo saxeexista foomkan waa mid mutadawac ah; si kastaba ha ahaatee, ma jirto wax gudbin ah si la isku diwaangaliyo barnaamijka ILSP kaasoo dhamaystiraya nidaamka iyadoo aanu jirin foom la saxeexay oo dhamaystiran. Si aad u codsato barnaamijkan, codsadayaashu waa inay la xidhiidhaan aging and disability resource center (wakiilkooda iyo xarunta khayraadka naafada iyo dadka duqa ah) (ADRC). Macluumaadka lagala xidhiidhayo goobta ADRCs waxa laga heli karaa [www.dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm](http://www.dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm).

**SIDA LOO ISTICMAALAYO FOOMKAN**

Foomka Codsiga ILSP (F-03161) waa inuu la socdaa dhammaan tixraacyada si loo diiwaan geliyo ama barnaamijka ILSP. Dhamaan macluumaadku waa inay noqdaan mid dhamaystiran oo sax ah. Saxiixa ka qaybqaataha ama saxeexa masuulka sharciga ah, ilaaliye, ama awooda qareenka ee firfircoon ayaa loo baahan yahay. Haddii codsaduhu ku saxiixo calaamad halkii la saxeexayay, laba markhaati saxiixooda ayaa loo baahan yahay. Haddii codsaduhu aan jidh ahaan awoodin inuu saxeexo, codsadaha waxa uu wakiilan kara qofkale oo wayn si uu ugu saxeexo foomka labo markhaati hortooda. Qofka u saxeexa codsadaha magaciisa isagoo matalaya waxa uu tilmaamayaa in uu u saxeexayo codsadaha asagoo ka wakiil ah.

Macluumaadka ka-qeybqaataha waxaa lala wadaagi doonaa Wisconsin Department of Health Services (Waxda Adeegyada Caafimaadka) iyo wakiilladeeda maamulka iyo qiimeynta barnaamijka ILSP.

**TILMAAMO DHEERAAD AH**

**Qaybta I**

- **Social Security Number (Nambarka Adeega Bulshada)** ayaa la codsaday si loo fudaydiyo nidaamka fiscal agent (wakiilka maaliyadeed) ee waraaqaha ka qaybqaataha shaqaalaysiiyaha iyo ujeedooyinka qiimaynta xogta barnaamijka.

**Qaybta II**

- Halkii [8 U.S.C. 1621\(a\)](#), kaliya muwaadiniinta Maraykanka ah, Dadka Dhaladka Maraykanka ah, ama soogalooti gaar ah oo haysta dhokumantiyo ayaa iska diwaangalin kara ILSP.
- **Xarun la aqoonsanyahay ama leysin leh** waxa kujira laakiin aan ku xadidnayn adult family home (guri qoys dad waawayn) (AFH), community-based residential facility (xarun ladaganyahay oo bulshada ku dhisan) (CBRF), xarunta kalkaalisoooyinka xirfada leh, ama residential care apartment complex (dhismaha daryeelka dadka deegaanka) (RCAC).
- Kunoolaanshaha **goobta adeega ee ADRC** waxaa lagu qeexaa inay degan yihiin degmada ama degmooyinka ay ADRC siiso adeegyada. Qofka waxaa loo tixgalinayaa inuu deggen yahay degmo haddii uu jir ahaan joogo degmada oo uu ku nool yahay meel degaan cayiman isagoo doonaya inuu si ikhtiyaari ah u joogo.
- **Daryeelka mudada dheer ee Medicaid** barnaamijyada waxa kujira: Include, Respect, I Self-Direct (Waxa kamid ah, Xushmayn, Iswadid) (IRIS), Family Care, Family Care Partnership iyo Program of All-Inclusive Care for the Elderly (Barnaamijka Dhamaan Daryeelka Dadka Waawayn) (PACE).
  - Diwaangelinta daryeelka mudada dheer ee barnaamijka daryeelka Medicaid waxay u qalantaa codsadayaasha ILSP.

- Diwaangalinta caymiska caafimaadka ee Medicaid **uma qalmo** codsadaha ILSP.
- Dhamaan codsadyaashu waa inay siiyaan **baadhista asaasiga ah**. Haddii codsaduuhu uu yahay 55 sano ama ka weyn oo aan baadhista aasaasiga ahi khusayn, ogaanshaha "Da'da 55+ oo aan haysan baadhista aasaasiga ah" ayaa gali kara.
  - Si aad ugu qalanto, baadhistu waa inay sababtaa baahi jireysa oo la filayo inay socoto in ka badan 90 maalmood laga bilaabo taariikhda codsiga ILSP.
  - Baadhista Nooca Xanuunka Dhimirka qaybtaas kuma haboona baadhista asaasiga ah ee ILSP.
  - Fadlan latasho Baadhista ILSP ee Liiska Baadhisaha La Ogolyahay.
- **Baadhitaan dheeraad ah** looma baahna laakiin waxay noqon lahaayeen kuwo caawimo leh haddii lagu daro. Baadhitaannada kooxda bartilmaameedka ah ee Nooca Xanuunka Dhimirka waa la oggol yahay qaybtan. Haddii aan la fileyn in cudurro kale oo dheeraad ah inay keenaan baahiyo shaqo oo soconaya in ka badan 90 maalmood, AAN KU HABOONAYN ayaa la dooran karaa.
- Dhamaan codsadyaasha **Dakhligooda** waa inuu kujiraa si loo gaadho wadarta guud. Codsadyaasha leh wadarta dakhliga guud ee ka weyn 300% ee [Federal Poverty Level \(Heerka Saboolnimada Federaalka\)](#) kuma haboona barnaamijka ILSP. Dakhliga iyo hantida lamaanaha laguma tixgeliyo codsiga barnaamijka ILSP.
- Codsadyaashu waa inay ku jawaabaan "Haa" ugu yaraan hal su'aal **Functional Eligibility Screening Tool (Agabka Kalasaarida Shaqada Ku haboonaanshaha)** si ay ugu qalmaan ILSP.
  - Jawaabaha "Mararka qaarkood" waa in lagu calaamadiyaa "Haa."
  - Xataa haddii codsaduuhu uu "Haa" kaga jawaabay su'aasha, dhammaan su'aalaha ka hadhay agabka waa in laga jawaabaa ka hor inta aan la diwaangelin barnaamijka ILSP.
- **Aqoonsi sax ah** waxa ku jira baasaboora Maraykan ah, sharciga darawalnimada ee gobolka ama kaadhka aqoonsiga gobolka, sawirka aqoonsiga dugsiga, sawirka aqoonsiga shaqaalaha, kaadhka aqoonsiga militariga ku tiirsan, aqoonsiga milatariga ama diiwaanka qabyada, diiwaanada waxyaabaha taariikhiga ah, sida Kaadhka aqoonsiga waxyaabaha qadiimiga, aqoonisga liiska qabiilada, Shahaadada Dhiiga Inaad tahay Hindida dhulka dhaladka, dhukumantiga tirakoobka dukumiintiyada khabiilada khadimiga, ama dhukumantiyada ku qoran warqadda suldaanada qabiilada, ama sawirka Kaadhka Aqoonsiga United States Citizenship and Immigration Services (Muwaadinimada Maraykanka iyo Adeegyada Waaxda Socdaalka) (USCIS).

### Qaybta III

- **Saxiixa** foomka codsiga waa ogolaansho sharci ah si aad uga qaybgasho barnaamijka ILSP.

### Qaybta IV

- ADRC waxay ku calaamadin doontaa foomamka codsadaha taariikhda diiwaangelinta oo la mid ah taariikhda saxiixa.
- ADRC waxay ku calaamadin doontaa foomamka sababta aanu ugu qalmin.
- Qaybtani waxay siinaysaa ogaysiis codsadyaasha ILSP ee natiijada codsiyadooda.

### Qaybta V

- Shaqaalaha ADRC waxay galin doonaan macluumaadkooda.

# INDEPENDENT LIVING SUPPORTS PILOT (BARNAAMIJKA TAAGEERISTA NOLOL MADAXBANAAN): CODSIGA

## I. MACLUUMAADKA GUDBINTA

### Tirakoobka

|                                                                                                                                                                              |                                                                                                                                                                     |                                        |                                                   |
|------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|----------------------------------------|---------------------------------------------------|
| Magaca (Magaca Awoowga, Magaca Koowaad, Magaca Dhexda Kujira)                                                                                                                |                                                                                                                                                                     | Taariikhda Dhalashada                  | Tixraaca ADRC                                     |
| Cinwaanka                                                                                                                                                                    |                                                                                                                                                                     | Magaalada                              | Lambarka Boostada Xaafadda (Zip)                  |
| Lambarka Taleefanka                                                                                                                                                          |                                                                                                                                                                     | Cinwaanka Boostada Internetka (limayl) | Wakhtiga Lagula soo Xidhiidhi Karo                |
| Masuul Sharciyeysan<br><input type="checkbox"/> Shaqsiga Masuulka ah<br><input type="checkbox"/> Masuulka Maaliyadeed<br><input type="checkbox"/> Aan Ku Haboonayn           | Kashaqaysiinta Awooda Masuulka Guud<br><input type="checkbox"/> Daryeel Caafimaad<br><input type="checkbox"/> Maaliyad<br><input type="checkbox"/> Aan Ku Haboonayn | Magaca – Masuulka / POA                |                                                   |
|                                                                                                                                                                              |                                                                                                                                                                     | Cinwaanka Boostada Internetka (limayl) |                                                   |
|                                                                                                                                                                              |                                                                                                                                                                     | Lambarka Taleefanka                    | Wakhtiga Lagula soo Xidhiidhi Karo                |
| Caymiska Caafimaad<br><input type="checkbox"/> Medicare <input type="checkbox"/> Medicaid <input type="checkbox"/> Caymiska Gaarka a <input type="checkbox"/> Aan Caymisnayn |                                                                                                                                                                     |                                        | Social Security Number (Nambarka Adeega Bulshada) |

### Jinsiga

☐ Dhedig ☐ Lab ☐ Jinsiga Badalay – Dhedig ☐ Jinsiga Badalay – Lab ☐ Waxkale  
☐ Ma rabo in aan ka jawaabo

### Jinsiga/Haybta

☐ Hindi Maraykan ah/Alaskan Dhalad ah ☐ Eeshiyaan ☐ Madaaw ama Afrikaan Maraykan ah  
☐ Hayb ahaan Hispaanik ah ☐ Hawiyaan Dhalad ah ama Baasifik Dadka Kunool ☐ Cadaan  
☐ Kuwo kale ☐ Ma rabo in aan ka jawaabo

Waa maxay luuqada aad doorbidayso?

Turjumaan luuqadeed ayaa loo baahan yahay  
☐ AAN KU HABOONAYN Luuqada:

### Qofka Lala Xidhiidhaya

(Buuxi kaliya haddii codsaduhu uu codsado shaqsi kale inuu noqdo qofka lagala xidhiidhaya)

|                                 |            |                     |                                    |
|---------------------------------|------------|---------------------|------------------------------------|
| Qofka Lala Xidhiidhaya – Magaca | Xidhiidhka | Lambarka Taleefanka | Wakhtiga lagula soo xidhiidhi karo |
|---------------------------------|------------|---------------------|------------------------------------|

## II. MACLUUMAADKA KU HABOONSHAHA

- ☐ Waxaan ahay muwaadin Maraykan ah ama qaxoonti u qalma [8 U.S.C. 1621\(a\)](#).  
☐ Kuma nooli xarun sharciyaysan ama aan u qalmo.  
☐ Waxaan ku noolahay goobta adeega ee ADRC.

Magaca (Magaca Awoowga, Magaca Koowaad, Magaca Dhexda Kujira)

Taariikhda  
Dhalashada

Tixraaca ADRC

- ☐ Hadda kama diwaangashani daryeelka mudada dheer long-term care (daryeelka caafimaadka mudada dheer) ee barnaamijka (LTC) Medicaid.
- ☐ Aqoonsi Sax ah oo lasiiyay:

Baadhista Asaasiag ah:

Baadhis Dheeraad ah:

### Dakhli

Shay kasta oo hoose, geli wadarta guud (kahor intaan la jarin) dakhliga sanadlaha ah ee la filayo 12 bilood. (Ha ku darin dakhliga xaaskaaga)

|                                                |    |
|------------------------------------------------|----|
| Korodhka Adeega Bulshada                       | \$ |
| Mushaharka Guud                                | \$ |
| Ribada, Qaybta, iyo Korodka Hantida            | \$ |
| Dakhliga Saafiga ah ee Qofka Iskii u shaqaysta | \$ |
| Dakhliga Hawlgabka                             | \$ |
| Dakhliyada Kale                                | \$ |
| Wadarta Guud                                   | \$ |

### Agabka Kalaxulista Shaqada Ku Haboonaanshaha

| Dhibaato ma ku qabtaa ama ma u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad qabato mid ka mid ah hawlaha maalinlaha ah?                                                                                                                                                                                                                                                                                                                  |                                 |                                  |
|---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|---------------------------------|----------------------------------|
| 1. Maydhashada<br>Awooda qubaysiga, maydhashada ama qaadashada burushka ujeedada ilaalinta nadaafadda ku filan. Oo ay ku jirto Gelitaanka iyo ka soo bixista suuliga, shidista iyo daminta tuubada, iyo hagaajinta heerkul ammaan ah. Maydhista iyo qalajinta jidhka. Shaamboo marinta timaha.                                                                                                                                  | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |
| 2. Labiska<br>Awooda in si badqabta u labisto ama dharka iskaga saaro. Tan waxaa ku jira qaarka sare iyo kan hoose ee jidhka, dharka hoosta loo xidho, sharabaadada, iyo kabaha. Xidhashada iyo saarista lugaha macmalka ah, aaladaha lafaha, tuumbada ka ilaalisa dhiigbaxa (Those TED), alaabada ama agabka cadaadiska, iyo/ama aaladaha cadaadiska yareeya. Awooda garashada ee lagu dooran karo dharka cimilada ku habboon. | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |
| 3. Cunto cunista<br>Cuntada ama cabitaanka laga helo saxan, baaquli, fijaan ama koob afka lagaarsiiyo (cunista haddii loo baahdo iyo liqidda) iyadoo la isticmaalayo maacuunta caadiga ah ama qabsashada mulqaadaha.                                                                                                                                                                                                            | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |
| 4. Socodka ama dhaqdhaqaaqa<br>Awooda u socodka inta u dhaxaysa goobaha (oo ay kujiraan kaabadaha) goobta uu shaqsiga ku noolyahay. Goobta lagu noolyahay waxaa lagu qeexaa madbakha, qolka cuntada, qolka fadhiga, musqusha, iyo goobta hurdada.                                                                                                                                                                               | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |

| Magaca (Magaca Awoowga, Magaca Koowaad, Magaca Dhexda Kujira)                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                               | Taariikhda Dhalashada           | Tixraaca ADRC                    |  |
|---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|---------------------------------|----------------------------------|--|
| 5. Isticmaalka suuliga<br>Awoodda si badqabta loogu isticmaalo musqusha, kuraasta, sariirta, ama kaadida si loo maareeyo saxarada iyo/ama kaadiheysta marka guriga lajoogo. Waxa kujira meelaynta musqusha ku dhextaala goobta aad ku nooshahay, galista iyo kasoobixista suuliga, nadiifinta meelaha u dhaw xubinta taranka, badalista agabka caadada iyo/ama agabka xejiyaasha, ama maaraynta katiitarka ama goobta laga qalay.                                                           | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |
| 6. Wareejinta<br>Awooda in ay si badqabta ugu kala socdaasho laba meelood. Oo ay kujirto inuu tago meel la istaagayo oo uu dib ugasoo noqdo.                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |
| 7. Cunto Diyaarinta<br>Awooda uu si baqdabta ku heli karo oo uu u diyaarin karo cunto fudud, oo ay kamid yihiin hawsha dukaamaysiga khudaarta. Oo ay kujiraan furitaanka weelasha cuntada, qalabka u isticmaalida madbakha, si badqabta u dhigaya cuntada weelka kujirta oo u gaynaya miiska, yar-yaraynta cuntada, si sax ah u diyaarinta iyo nadaafada cuntada. Helitaanka khudaarta oo ay kujiraan ku celinta cuntada dukaanka, gaynta bacaha gaadhiga iyo guriga, iyo dhigista cuntada. | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |
| 8. Daawooyinka<br>Maamulka: In lagu qaato ama lagu siiyo daawo waddo kasta (afka, la mariyo, la isku mudo iwm.) marka laga reebo xididka (IV) ee uu dhakhtarku u qoro oo si joogto ah loo qaato.<br>iyo/ama<br>Maaraynta: in ladajiyo ama la maamulo daawooyinka qofka looso qoray oo si joogto ah loogu mudeeyo oo loo isticmaalo daawaynta. Tan waxa kujirta dajinta daawaynta iyo maaraynta daawaynta.                                                                                   | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |
| 9. Lacag Maamulida<br>Awooda lagu maamulo lacagta oo ay ku jiraan bixinta biilasha iyo dhamaystirka macaamilka maaliyadeed ee baahiyaha aasaasiga ah (cuntada, hoyga, iyo dharka).                                                                                                                                                                                                                                                                                                          | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |
| 10. Shaqooyinka Guriga<br>Awooda dhamaystirka dhar maydhista shaqsi, ilaalinta joogtada ah ee guriga, iyo hawlaha dayactirka guriga. Tan waxaa ka mid ah dhar-dhaqidada, buufinta, xadhista, weelka, nadiifinta musqusha, xadhista meelaha hooseeya, qaadista qashinka, jaridda cawska, iyo qaadista barafka.                                                                                                                                                                               | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |
| 11. Isticmaalka Telefoonka<br>Awooda jidheed iyo garasho ee qofku u leeyahay in uu isticmaalo taleefoon ama qalab kale si uu xogta dadka kale isku dhaafsadaan, isgaadhsiin laba dhinac ah.                                                                                                                                                                                                                                                                                                 | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |
| 12. Gaadiidka<br>Awooda jidheed iyo garasho ee lagu wado baabuur si joogto ah ama la qabsi.                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                 | Haa<br><input type="checkbox"/> | Maya<br><input type="checkbox"/> |  |

Magaca (Magaca Awoowga, Magaca Koowaad, Magaca Dhexda Kujira)

Taariikhda  
Dhalashada

Tixraaca ADRC

### III. HESHIISKA

Waxaan cadeynayaa, sida ku xusan ciqaabta been-abuurka iyo dhaarta beenta ah, in dhammaan jawaabahaygu ay sax yihiin oo ay dhammaystiran yihiin inta aan ogahay, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan jinsiyadda ama socdaalka.

Haddii la ii arko inaan mudanahay, waxaan oggolahay inaan iska diiwaan geliyo Independent Living Supports Pilot (Barnaamijka Taageerista Nolol Madaxbanaan) iyo in aan raaco dhammaan xeerarka barnaamijka ee ku jira buug yaraha kaqaybgalaha.

Waxaan oggolahay in macluumaadkeyga lala wadaago Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) iyo wakiilladeeda maamulka iyo qiimeynta barnaamijka ILSP.

**SAXIIXA** – Codsadaha

Taariikhda

**SAXIIXA** – Masuulka Sharciga ah, Ilaaliyaha, ama Wakiilka Sharciga ee Maaliyada

Taariikhda

**SAXIIXA** – Masuulka Sharciga ah, Ilaaliyaha, ama Wakiilka Sharciga ee Maaliyada

Taariikhda

**SAXIIXA** – Markhaatiga (haddii ay ku khuseyso)

Taariikhda

**SAXIIXA** – Markhaatiga (haddii ay ku khuseyso)

Taariikhda

### IV. NATIIJADA KU HABOONAANTA (si ay u dhamaystiraan ADRC)

☐ Codsaduhu wuxuu u qalmaa barnaamijka ILSP Taariikhda Isdiiwaangelinta: \_\_\_\_\_

☐ Codsaduhu uma qalmo barnaamijka ILSP sababtan(sababahan) awgood:

☐ Maaliyad ahaan kuma haboona

☐ Aan buuxin baahida shaqo

☐ Malaha baadhitaan lagu aqoonsanayo

☐ Ka diiwaan gashan barnaamijka Medicaid LTC

☐ Kunool goob sharciyaysan ama leysin leh

☐ Aan ku noolayn goobta adeega ee ADRC

☐ Aan buuxin shuruudaha dhalashada

### V. DHAMAYSTIRKA MACLUUMAADKA

Magaca – Shaqaalaha ADRC

Taariikhda

Lambarka Taleefanka

Cinwaanka Boostada Internetka (limayl)